**TOWERS CLASS ACTION**

**IDRIS HASSAN**

**IYO**

**HAWA WARSAME**

**V**

**DAWLAD**
**GOBOLEEDKA**
**FIKTOORIYA**
**(S ECI 2021 00826)**

# OGEYSIINTA XALINTA LA SOO JEEDIYEY

**Fadlan akhri ogeysiintaan si degan kana feker haddii talaabo intaas badan loo baahan yahay. Ogeysiintaani waa dukuminti muhiima kaas oo ka kooban macluumaad laga yaabo inay saamayso xuquuqdaada sharciga ah.**

**1. Waa maxay sababtaad u helayso ogeysiintaan?**

19kii Maarso 2021, Mudane Idris Hassan iyo Ms Hawa Warsame (**mudici**), ayaa ka billaabay dacwad ah Class Action Maxkmada Sarre (Suprem Court of Victoria (**Dacwad** ka soo horjeeda Dawlada Fiktoriya (**Is-difaace**) si ay uga loolamaan:

- Xiritaankii guryaha dadweynaha ee ku yaalla 9 Pampas Street, 159 Melrose Street, 76 Canning Street iyo 12 Sutton Street, North Melbourne iyo 120, 126 iyo 130 Racecourse Road iyo 12 Holland Court, Flemington (**) Estate Towers**) intii u dhexaysay 4 iyo 9kii Juulay 2020; iyo

- 'Xiritaankii' ku socday dadka degan 33 Alfred Street, North Melbourne Tower intii u dhexaysay 10 iyo 18kii Juulay 2020.

Dacwada waxaa keenay shakhsiyan muduciin, iyaga oo matalaya naftooda iyo kuna hadlaya magaca dadka kale kuwaas oo qaba isla dacwadaas (**Xubna Kooxeed**).

Dadka dacwada ahi waxay sheegeen in kuwa isdifaacayaa:

(a) Ay si khalad ah u xireen kuwa dacwoonaya xubnaha kooxda ilaa 14 berri bishii Juulay 2020; ayna si khalad ah

(b) ugu handadeen kuwa dacwoonaya iyo xubnaha kooxda gacan ka hadal, haddii ay ka isku dayaan inay ka baxaan sarraha Towers-ka.

Kuwa isdifaacayaa waa inkireen dacwooyinkaas.

Kuwa dacwoonaya iyo kuwa isdifaacayaa waxay gaareen heshiis lagu xaliyo dacwada iyada oo xal la keenayo maxkamad la’ aan. Xalka la soo jeediyey wuxuu dhaqan gelayaa haddii ay Maxkamadu ansixiso. Haddii xalka la soo jeediyey la ansixiyo, waxay saamaynaysaa xuquuqda Xubnaha Kooxda.

Maxkamadu waxay amartay in ogeysiintaan la daabici doono macluumaadka shakhsiyaadka laga yaabo inay Kooxda ka mid yihiin. Waxaad u hellaysaan ogeysiintaan sababtoo ah waxaa laga yaabaa inaad tahay Xubin Kooxeed.

**2. Waa maxay ogeysiintaani?**

Ogeysiintaani waxay ka kooban tahay maclumaad muhiima oo ku saabsan xalinta la soo jeediyey oo ay ku jirto:

(a) sida go’aan looga gaarayo inaad tahay Xubin Kooxeed lagana yaabo inaad ka qaybgasho Xalinta la soo jeediyey;

(b) Shuruudaha Xalinta la soo jeediyey iyo sida ay u khusaynayso Xubnaha Kooxda; iyo

(c) waxaad u baahan tahay inaad samayso haddii aad doonayso:

   i. **Diiwaangeli** inaad ka qaybgasho Xalinta la soo jeediyey;

   ii. **iskaga bax** Xalinta la soo jeediyey joojina inaad Xubin ka tahay Dacwa samaynta; ama

   iii. **Diid** xalinta la soo jeediyey.

***Waa muhiim inaad akhrido ogeysiintaan si degan sababtoo ah waxay ka kooban tahay macluumaad ku saabsan waxaad u baahan tahay inaad samayso ayna saamayso xuquuqdaada.***

Haddii uu jiro wax ku jira ogeysiintaan oo aadan fahmin, ama haddii aad doonayso macluumaad intaas ka badan kala xiriir cida matalaysa kuwa dacwoonaya kuwa matalaya, Clemens Haskin Legal, tel: 9988 5035 ama email info@clemenshaskin.com, ama raadso cid sharciga kugu matasha.

Haddii aad u baahan tahay koobiga ogeysiintaan luqad kale, koobiyada la heli karaa waa Amxaari, Carabi, Oromo, Jayniis la khafiifiyey (simplified Chinese), Somali, Tigrinya, Jayniiska dhaqameed, Turkish iyo Fiyatnaamiis health.vic.gov.au/covid-19-towers laga bilaabo 10kii May 2023.

Haddii aad ka yarayd 18 sanadood 27dii Juun 2023, ama haddii aadan awoodi karin sabab la xiriirta dhaawac, jiro, daciifnimo, bugto ama dhibaato jireed ama maskaxeed xagga maaraynta arimahaaga wixii la xiriira dacwad samaynta (**Qof qaba iin**), fadlan sii ogeysiintaan qofka masuulka kaa ah ama qofka ku matala (haddaad haysato mid).

Haddii aadan hubin inaad tahay qof leh iin, waxaa laga yaabaa inaad la xiriirto Clemens Haskin Legal, raadso cid kaala talisa sharciga ama keenso qof kale oo sidaas ku sameeya magacaaga.

**3. Yaa ah Xubinta Kooxeed?**

Waxaa laga yaabaa inaad kooxda ka tirsan tahay haddii aad deganayd ama joogtay:

(a) Cinwaanada soo socda midkood:

i. 12 Holland Court, Flemington 3031;

ii. 120 Racecourse Road, Flemington 3031;

iii. 126 Racecourse Road, Flemington 3031;

iv. 130 Racecourse Road, Flemington 3031;

v. 9 Pampas Street, North Melbourne 3051;

vi. 12 Sutton Street, North Melbourne 3051;

vii. 33 Alfred Street, North Melbourne 3051;

viii. 76 Canning Street, North Melbourne 3051;

ix. 159 Melrose Street, North Melbourne 3051;

(wadajir, the **Estate Towers**); iyo

(b) Waqti kasta laga soo bilaabo:

i. Qiyaastii 4.00 galabtii ilaa 4:30 fiidkii 4ta Juulay 2020 (ama waqtigaas ka dib) ilaa 5.00 casarkii 9ka Juulay 2020 (xaalka 9 Pampas Street, North Melbourne) iyo 4.00 galabtii ama 4:30 galabtii 4ta Juulay 2020 (mudo yar ka dib) ilaa 11:59habeenimo 9ka Juulay 2020 xaalka dhamaan kuwa kaleeto ee Estate Towers; ama

ii. 11:59 habeenimo 9kii Juulay 2020 ilaa 11:59 habeenimo 18kii Juulay 2020 xaalka 33 Alfred Street, North Melbourne.

**4. Waa maxay xalinta la soo jeediyey?**

Dacwoodayaasha iyo kuwa isdifaacayaa waxay isku raaceen in la xaliyo Dacwada. Haddii Xalka la soo jeediyey ay aqbasho maxkamadu, Dacwada waxaa lagu xalin doonaa is-afgarad Maxkamadana la qaadi mayo.

Qodobada ugu waaweyn Xalinta la soo jeediyey waa:

(a) Kan isdifaacayaa wuxuu bixin doonaa lacag dhan ($5,000,000.00) (**lacagta guud oo lagu xalinayo**;

(b) Kuwa dacwoonayaa waxay ka codsan karaan Maxkamada in laga gooyo qadar lacagta Xal-gaarida ah iyada oo la aqoonsanayo doorkooda hogaaminta dacwada u matalayey Xubnaha Kooxda xagga Dacwada (**Qadar dib u celin ah**). Qadar kasta oo lacag ah oo la siiyo dacwoodaha waa in ay ansixisaa Maxkamadu;

(c) Inta ka harta Lacagta Xalinta, ka dib marka lacag la siiyo Dacwoodayaasha, markaas ka dib ayaa loo qaybin doonaa Xubnaha Kooxda kuwaas oo ka diiwaangashan xalinta (settlement). Qof kasta oo ka qaybgelaya oo ah Xubin Qaangaara ee Kooxda wuxuu heli doonaa in isle'eg lacagta Xalinta, Xubnaha Kooxda Ilmaha (kuwii ka yaraa 16 sano 4tii Juulay 2020) waxay hellayaan 50% inta qof ka weyni hellayo.

(d) Kharajyada kale oo dacwada, oo ay ku jirto kharajka maxkamada iyo kharajka qaybinta Xalinta lacagta, ***lagama*** goyn doono Lacagta Xalinta. Kharashaadka, oo ay ku jiraan kharajka Dacwoodaha (sida maxkamadu ansixisay) waxaa bixinaya isdifaacaha.

Habka meelaynta iyo qaybinta Lacagta Xalinta waxaa lagu sharxay hoos 6da.

Iyada oo laga jawaabayo Lacag bixinta (Settlement Sum), dacwoodayaasha iyo xubnaha Kooxdu waxay ka joojinayaan isdifaacaha dacwooyinka lagu muujiyey Caddaynta ama Qoraalka dacwada oo taariikhdeedu ahayd 24kii Sebteembar 2021, jawaabtooduna ku taariikhaysnayd 27dii Janaayo 2022, dhamaana sheegashada la xiriirta wixii ka soo baxay arrinta dacwada ama la xiriira arrinta lagaga hadlayo dacwada ama la mid iyada ama xaalladaas (**ashtakada**).

**5. Waa maxay habka ansixinta xalintii la soo jeediyey?**

Sida lagu sharxay kor 4, xalinta la soo jeediyey waxay dhaqangelaysaa keliya haddii ay Maxkamadu ansixiso. Si loo go'aamiyo inay ansixin doonaan Xalinta la soo jeediyey, Maxkamadu waxay qadarin doontaa haddii xalinta la soo jeediyey tahay xaq iyo maangal iyo danta Xubnaha kooxda dhamaan, ma aha keliya kuwa dacwoonaya. Dhegaysigaan ansixinta Xalintaan waxaa la qaban doonaa 24ka Juulay 2023 waxaana lagu qaban doonaa Supreme Court of Victoria (Maxkamada Sarre ee Fiktooriya). Xubnaha Kooxdu waxay xaq u leeyihiin inay yimaadaan dhegaysiga.

Haddii aad qadariso in laga yaabo inaad koox ka tirsan tahay aadna doonayso inaad ka qaybgasho, doorato inaad ka baxdo dacwada ama diido Xalinta la soo jeediyey, waa inaad talaabo qaadaa ***ka hor*** maalmo siday xakuntay maxkamadu. Ficilada laga yaabo inaad qaado iyo go'naanadka khuseeya waxaa lagu sharxay hoos 7da.

## 6. Waa maxay habka lacagbixinta qadarka lagu heshiiyey?

Haddii Xalinta la soo jeediyey ay ansixiso Maxkamadu, Lacagta Xalinta ayaa loo qaybinayaa dadka dacwoonaya iyo Xubnaha Kooxda iyada oo waafaqsan shuruudaha lagu heshiiyey ayna ansixisay Maxkamadu (**Habka Qaybinta Xalinta (lacagta)**). Maxkamada ayaa magacaabi doonta maamule si:

(a) Uu u qiimeeyo dacwooyinka ay sameeyeen Kooxdu wixii waafaqsan Mashruuca Qaybinta lacagta; iyo

(b) Ka siinta Xubnaha Kooxda laga bilaabo Lacagta Xalinta taas oo qaansheegadka la asaasay.

Dacwoodaha iyo isdifaacaha ayaa waxay isku raaceen in ay raadiyaan ansixinta Xoghayaha Wasaarada Caafimaadka, Professor Euan Wallace AM si loogu magacaabo **Maamule**. Maamuluhu wuxuu qaybin doonaa lacagta lagu heshiiyey si niyad wanaag ah iyo aaminaad kuna salaysan taxadar iyo xirfad iyo danta xubnaha Kooxda guud ahaan, mana aha matalaad Xubna ka tirsan Koox gaara.

Mashruuca Xalinta Qaybinta wuxuu ku muujiyey foormalada lacag qaybinta lifaaqa 8aad.

Koobiga Mashruuca Qaybinta Xalinta, kaas oo xakumi doona qaybinta lacagta lagu heshiiyey, waa Annexure hoos waana online health.vic.gov.au/covid-19-towers.

## 7. Ficilkee ayay qaadayaan Xubnaha kooxdu?

Waxaa jira saddex ficil oo laga yaabo inaad qaado si aad uga jawaabto ogeysiinta. Ficiladaas ayaa loogu muujiyey hoos si faahfaahsan. Haddii aad u baahan tahay koobiyo la tarjumay oo dukumintiga hoose, waxaa la heli karaa 10ka May:

*Online:* health.vic.gov.au/covid-19-towers; iyo www.clemenshaskin.com;

*Koobiyo:* Wakiilada mudiciga ah wakiiladooda sharciga; iyo Xafiiska maamulka ee Estate Towers:

North Melbourne Housing Office
33 Alfred Street North Melbourne,
**Tel**: (03) 9326 6377

Xafiiska Gurisiinta ee Ascot Vale
12 Churchill Avenue, Ascot Vale
**Tel**: (03) 9371 6200

**Xalka 1aad:** **Isdiiwaangeli si aad uga qaybgasho Xalinta la soo jeediyey**

Waxaa adiga **waajib** kugu ah inaad isdiiwaangeliso si aad uga qaybgasho Xalinta la soo jeediyey haddii aad doonayso in lagu siiyo magdhow wixii la xiriira Dacwada.

Si aad isu diiwaangeliso si aad ka qaybgasho Xalinta la soo jeediyey, waxaa waajib kugu ah inaad buuxiso una soo celiso "**Foomka Ogeysiiska Magdhowga**" ugu dambayn **27da Juun 2023**.

Waxaa laga yaabaa inaad buuxiso Ogeysiiska Foomka Dacwada ugu dambayn:

(a) Adiga oo ku soo gudbinaya foomka online-ka laga hello health.vic.gov.au/covid-19-towers; ama

(b) Adiga oo buuxinaya foomka Dacwada ogeysiinta foomka Annexure B oo ogeysiintaan ku soo celi maamulaha:

i. Email-ka ku soo dir: COVID-19-Towers@health.vic.gov.au

ii. Boostada:
COVID-19 Towers
50 Lonsdale St
Melbourne Victoria 3000; ama

iii. Waxa lagu dirayaa:
COVID-19 Towers
50 Lonsdale St
Melbourne Victoria 3000

Maamulaha ayaa qadarin doona ashtakooyinka shakhsiyaadka oo iska diiwaangeliyey inay ka qaybgalaan degaanka la soo jeediyey. Haddii dejinta la soo jeediyey la ansixiyo Maamuluhuna go'aansado in qofka diiwaangashani uu yahay xubin kooxeed, lacagbixinta Xalinta ayaa samayn doonta qofka sida waafaqsan Mashruuca Qaybinta Xalinta.

Adiga oo siinaya foomka Ogeysiinta Dacwada Maamulaha, waad ogolaatay in Maamuluhu dalban doono Mashruuca Qaybta Xalinta (settlement) si go'aan looga gaaro haddii aad xaq u leedahay magdhowga lacagta Xalinta. Waxaad awoodi doontaa inaad raadiso dib u eegid madaxbanaan oo qiimaynta Maamulaha ee xaq u yeelashadaada iyo hanaanka sharci wixii la xiriira qaansheegadka ama qiimaynta foomkaaga ogeysiinta qaansheegadka.

**Xalka 2aad:** **Iska dhaaf Xalinta la soo jeediyey joojina inaad xubin ka tahay Xubnaha Kooxda Sii-wadida**

Waxaa laga yaabaa inaad joojiso Xubinta Kooxda xagga Socodsiinta adigoo dooranaya "iska-dhaaf" (opt out). Haddaad iska dhaafto Habraacu kuma xirayo Xalinta la soo jeediyey adiguna ma **awoodi**

**doontid** xaq u yeelasho si aad u hesho bixinta lacagta Xalinta. Xubnaha Kooxda oo iska dhaafay ayaa weli u bilaabi kara talaabo sharci ah si madaxbanaan wixii la xiriira qaansheegadka

Waqtiga ugu dambeeya oo ay horay u dejisay Maxkamadu xagga iska dhaafida dacwadu waa 1da Juulay 2022. Qof kasta oo soo qadima "iska dhaafid" ka hor taariikhda ayaa horayba isaga dhaafay.

***Haddaad doonayso inaad iska dhaafto socodsiinta dacawada:*** Maxkamadu waxay leedahay awooda ah inay ogolaato in kasta oo mudadii iska dhaafidu dhamaatay. Haddii aad jeclaan lahayd in Maxkamadu qadariso inay kuu ogolaato inaad ka baxdo, waxaa waajiba inaad buuxiso foomka magaciisu yahay "Notice of Application to Extend Time to Opt Out by a Group Member".

Waxaa laga yaabaa inaad buuxiso Ogeysiinta kor ku taalla adigoo ka buuxinaya foomka Annexure C oo ogeysiintaan ama online oo ah health.vic.gov.au/covid-19-towers kuna soo celinaya Maxkamada Sarre ee Fiktooriya ugu dambayn 29ka May 20223.

***Haddii aad horay isaga baxday aadna doonayso in dib laguugu celiyo Xubin Kooxeed ahaan:*** Maxkamadu waxay leedahay awooda dib loogu celinayo Xubin Kooxda ka mid ah ahaan. Haddii aad jeclaan lahayd in Maxkamadu ay qadariso dib ugu biirida Xubin Kooxeed ahaan, waxaa waajib kugu ah inaad buuxiso "Notice of Reinstatement of Group Member" ugu dambayn 29ka May 2023. Waxaa laga yaabaa inaad buuxiso Ogeysiinta Dib-u-magacaabida adigoo buuxinaya foomka Annexure D oo ogeysiiskaan online-ka ah health.vic.gov.au/covid-19-towers kuna soo celinaya Maxkamada Sarre ee Fiktooriya oo ku soo diraya boosta ama Email cinwaanka foomka ku yaalla.

***Haddii aadan hubin inaad horayba uga baxday:*** waxaa laga yaabaa inaad ta'kiidiso haddii aad horay uga baxday adigoo la xiriiraya mudicyiinta kuwa sharciga ku matalaya Clemens Haskin Legal.

**Xalka 3aad:** **Diid Xalka la soo jeediyey**

Haddii aad Xubin ka tahay Koox waxaad xaq u leedahay inaad u soo gudbiso Maxkamada inaad ogolaatay ama diiday taas oo maxkamadu ay tahay inay ansixiso xalinta la soo jeediyey.

Haddii aad u malaynayso in Maxkamadu aanayansixinta xalinta la soo jeediyey, waxaa waajiba inaad gudbiso diidmo adigoo buuxinaya " foomka loo yaqaan "Notice of Objection to Proposed Settlement". Waxaa laga yaabaa inaad buuxiso Ogeysiin Diidmo adigoo buuxinaya foomka Annexure E oo ogeysiintaan online ah
health.vic.gov.au/covid-19- towers iyo ku noqoshada Maxkamada Sarre ee Fiktooriya cinwaanka ogeysiinta ku yaalla.

Wax Ogeysiin kasta oo ah Diidmada waxaa waajib ku ah in loo gudbiyo Maxkamada ugu dambayn 29ka May 2023. Haddii aad doonayso inaad bixiso caddayn ama soo gudbin qoran si loo taageero diidmada, waxaa waajiba inaad keento qalabkaas Maxkamada ugu dambayn 13ka Juun 2023.

Maxkamadu waxay qadarin doontaa dhamaan Ogeysiisyada Diidmada ay ku buuxiyeen waqtiga Xubnaha Kooxdu markay qadariyeen ansixinta dejinta la soo jeediyey dhegaysigia 24ka Juulay 2023.

Waxaa laga yaabaa inaad diido dejinta la soo jeediyey *xataa haddii* aad qaadatay xalka 1aad iyo diiwaangelinta inaad ka qaybgasho xalinta la soo jeediyey.

Waxaa laga yaabaa in aadandiidin dejinta la soo jeediyey haddii aad qaadato Xalka 2aad iyo inaad iskaga baxdo Xalinta la soo jeediyey.

HADDII AADAN QAADAN FALALKAAN KOR LAGU SHARXAY MIDKOODNA FICILNA KA SAMAYN OGEYSIINTAAN, XAQ UMA LIHID INAAD KA QAYBGASHO DEJINTA LA SOO JEEDIYEY, HADDII AAN MAXKAMADU SI KALE U GO'AAMIN.
Sidoo kale, haddii aadan waxba ka samayn Xalinta la soo jeediyeyna la ansixiyey, Maamuluhu ma awoodi doono in uu qiimeeyo dacwadaada xaqna uma yeelanaysid inaad hesho qaybinta Lacagta Xalinta Sidoo kale waxaa ku xiraya soojeedinta la soo jeediyey mana awoodi doonto inaad keento dacwad lidi ku ah difaacaha wixii khuseeya Qaansheegadka.

## 8. U buuxinta Carruurta foomamka, qofka iinta leh iyo dadka kale oo aan awoodin inay is daryeellaan.

Haddii aad leedahay carruur ka yar 18 sanadood da' ahaan 27da Juun 2023 oo ah xubna Kooxeed oo doonaya diiwaangelin (Xalka 1aad), waxaad u baahan doontaa inaad ku darto faahfaahinta Foomka Ogeysiinta Qaansheegadka. Maaha inaad u buuxiso Ogeysiin gaara oo foomka Qaansheegadka iyaga
Haddii aad doonayso iyagu inay dalbadaan inay iskaga baxaan habka socda (xalka 2aad), waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso Dalab gaar ah si u dheerayso Waqtiga si aad uga baxdo foomka Xubinimada Kooxda mid kasta oo iyagag ah. Diidma kasta (Xalka 3aad) waxaa u samayn karaa ilmaha waalid kood ama Masuulka.

Haddii aad haysato masuul ama qofka ku matala oo loo magacaabay in uu adiga ku ilaaliyo, ama haddii aad tahay Qof iin leh, waxaad u baahan doontaa inaad u gudbiso dukumintigaan iyaga si ay kaaga caawimaan inaad go'aansato sida loo socodsiinayo.

## 9. Xaggee ka heli lartaa macluumaad ku saabsan dejinta la soo jeediyey?

Haddii aad doonayso macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan dejinta la soo jeediyey, waxaad heli kartaa koobiyada dukumintiga macnaha leh, kuwaas oo ay ku jiraan cadaymaha sheegashada, difaaca iyo dhaarta dejinta oo ka timid websaytka websaytka Maamulaha health.vic.gov.au/covid-19-towers ama websaytka qofka matalaya mudiciga, Clemens Haskin Legal, www.clemenshaskin.com.

Fadlan u qadari arrimaha kor ku xusan si degan Haddii aadan hubin inaad Xubin ka tahay Koox ama doonayso macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan falka aad qaaday, waxaa waajiba inaad la xiriirto Clemens Haskin Legal 03) 9988 5035 ama email info@clemenshaskin.com, ama raaadi lataliyahaaga sharciga.

Ogeysiinta waxaa lagu daabacay si waafaqsan Amarada ay samaysay Maxkamada Sarre ee Fiktooriya 20kii Abriil 2023.